# SONSA Bulletin

Civil Society Monthly Newsletter

JULY 2025




## Dabaaldegga Sannadguurada 65aad ee Xorriyadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

**01 Luulyo 2025**

Guddoomiyaha Ururrada Bulshada Rayidka Soomaaliyeed, **Mudane Osman Moallim Mohiadin (Shatah)**, ayaa hambalyo qalbi furan u diray dhammaan shacabka Soomaaliyeed, gudaha dalka iyo dibedda jooga, munaasabadda sannadguurada 65aad ee dhalashada Jamhuuriyadda Soomaaliyeed awgeed. Wuxuu xusay muhiimada weyn ee maalintan taariikhiga ah oo astaan u ah midowgii labada gobol ee Waqooyi iyo Koonfur ee horey u kala gumeysan jireen Ingiriiska iyo Talyaaniga. "Maanta, waxaan xusuusaneynaa geesinimada iyo naf-hurnimada halyeeyadii u soo halgamay xorriyadda, anagoo cusbooneysiinayna ballanqaadkeenna ku aaddan midnimada, nabadda, iyo horumarka dalkeenna. Allaha ka dhigo calankeennu mid mar walba sare u babanaya, shacabka Soomaaliyana ha ku midnaadaan sidii ay u gaari lahaayeen mustaqbal ifaya," ayuu yiri guddoomiyuhu.

**Mudane Osman Moallim Mohiadin (Shatah)** ayaa sidoo kale ka qaybgalay xafladda taagista calanka ee ka dhacday Madaxtooyada Qaranka (Villa Somalia), taasoo lagu xusayey midowgii iyo xornimada labada gobol ee Soomaaliyeed. Wuxuu hoggaaminayay wafdi ka socday SONSA, isaga oo halkaas kula kulmay madaxda dowladda iyo mas'uuliyiin kale oo heer qaran ah. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud, ayaa halkaas ka jeediyay khudbad muhiim ah. Ka-qaybgalka firfircoon ee bulshada rayidka Soomaaliyeed ee munaasabaddan qaran waxay caddeyneysaa doorkooda muhiimka ah ee ku aaddan dhowrista midnimada, kor u qaadidda dimuqraadiyadda, iyo horumarinta wadajirka ah ee dalka.



## *Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Ka Qayb Qaadatay Wadatashi Qaran oo Ku Saabsan Khatarta Isticmaalka Khaldan ee Baraha Bulshada*

***03 Agoosto 2025***

**Xubno ka tirsan bulshada rayidka Soomaaliyeed ee SONSA** oo ay horkacayso Dalladda SONSA ayaa ka qaybgalay shir wadatashi qaran oo lagu falanqeeyay khatarta isticmaalka khaldan ee baraha bulshada. Shirka waxaa soo qabanqaabiyay Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska, waxaana si rasmi ah u furay Wasiirka Warfaafinta, Mudane Daud Aweis Jama. Intii uu socday kulanka, ka-qaybgalayaashu waxay diiradda saareen khataraha ugu waaweyn ee ku xeeran baraha bulshada iyo sidii loo dheellitiri lahaa xorriyadda hadalka iyo baahida loo qabo in la xakameeyo waxyaabaha waxyeellada iyo anshax-xumada leh.

Ka-qaybgalayaashu oo isugu jiray wakiillo ka socda bulshada rayidka, u doodayaasha xuquuqda dijitaalka ah, iyo saameeyayaal baraha bulshada ah, ayaa dib u eegay xeerarka jira iyo meelaha ka bannaan ee nidaamka lagu maamuli karo baraha bulshada. Waxa kale oo la qeexay waajibaadka hay'adaha dowladda, bulshada rayidka, shirkadaha isgaarsiinta, iyo hay'adaha kale ee ay khusayso. Doodaha waxaa sidoo kale lagu falanqeeyay xeelado lagula tacaalayo xogaha khaldan, hadallada nacaybka ah, iyo muuqaallada sumcad-dilista iyo anshax-xumada leh ee lagu faafiyo baraha bulshada.

SONSA waxay markale muujisay inay ka go'an tahay wada-shaqeyn dhab ah oo lala yeesho dhammaan daneeyayaasha si loo helo siyaasad cad iyo xalal wax ku ool ah oo lagu ilaalinayo bulshadeenna dijitaalka ah, iyadoo la dhowrayo xuquuqda iyo xorriyadda dijitaalka ee muwaaddin kasta. Wadatashigan qaran wuxuu qayb ka yahay dadaallada mashruuca ReCIPE oo uu hogaaminayso Oxfam Ireland, isla markaana ay maalgelisay Midowga Yurub, lagana hirgelinayo gudaha Soomaaliya iyada ay ay fulinayso Dalladda SONSA.



***Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Ka Qaybqaadatay Wadatashi Qaran oo Ku Saabsan Aqoonsiga Dijitaalka ah iyo Kaabayaasha Dadweynaha ee Soomaaliya***
***09 Luulyo 2025***

Bulshada rayidka Soomaaliyeed oo uu horkacayo Kooxda Mashruuca ReCIPE ee SONSA ayaa ka qaybgalay kulan wadatashi heer sare ah oo socday laba maalmood, kaas oo ay soo qabanqaabisay hay'adda NIRA, laguna soo bandhigay warbixinta qiimeynta ay UNDP Soomaaliya ka samaysay kaabayaasha dijitaalka ah ee dalka. Shirka ayaa diiradda saaray Model Governance Framework-ka UNDP ee nidaamka Aqoonsiga Dijitaalka ah ee Soomaaliya iyo arrimaha horumarinta Kaabayaasha Dadweynaha ee Dijitaalka (DPI) si ay noqdaan kuwo ammaan ah oo loo wada siman yahay.

Kulanka waxaa lagu soo bandhigay natiijooyinka qiimeynta ku saabsan hab-maamulka nidaamyada Aqoonsiga Sharciga Dijitaalka ah iyo Kaabayaasha Dadweynaha ee Dijitaalka, iyo Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee NIRA ee sanadaha 2025–2029. Ujeeddada shirka waxay ahayd inay dhiirrigeliso wadahadal furan, is-weydaarsi aqooneed, iyo ansixinta natiijooyinka muhiimka ah ee horumarinta aqoonsiga dijitaalka ah iyo ajendaha DPI ee Soomaaliya.

Ka-qaybgalayaasha oo ay ku jiraan kooxda Mashruuca ReCIPE ee SONSA ayaa si firfircoon uga qayb qaatay ansixinta qiimeynta UNDP, iyagoo bixinayey aragtiyo ku saleysan waayo-aragnimadooda bulshada iyo ilaalinta xuquuqda dijitaalka ah. Mashruuca ReCIPE waxaa si wadajir ah u maalgelinaya Midowga Yurub iyo Oxfam Ireland, waxaana lagu hirgelinayaa gudaha Soomaaliya si loo taageero maamulka dijitaalka ah ee ammaan ah, hufan, loona wada siman yahay




***Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Ka Qaybqaadatay Shirweynihii 3aad ee Horumarinta Bariga Afrika Muqdisho –***
***10 Luulyo 2025***

Bulshada rayidka Soomaaliyeed oo uu horkacayo Mashruuca ReCIPE ee SONSA ayaa ka qaybgalay kulan wadatashi heer sare ah oo socday laba maalmood, kaas oo ay soo qabanqaabisay hay'adda NIRA, laguna soo bandhigay warbixinta qiimeynta ay UNDP Soomaaliya ka samaysay kaabayaasha dijitaalka ah ee dalka. Shirka ayaa diiradda saaray Model Governance Framework-ka UNDP ee nidaamka Aqoonsiga Dijitaalka ah ee Soomaaliya iyo arrimaha horumarinta Kaabayaasha Dadweynaha ee Dijitaalka (DPI) si ay noqdaan kuwo ammaan ah oo loo wada siman yahay, iyadoo la tixgelinayo baahiyaha shacabka iyo xaqiijinta sinnaanta adeegyada.

Kulanka waxaa lagu soo bandhigay natiijooyinka qiimeynta ku saabsan hab-maamulka nidaamyada Aqoonsiga Sharciga Dijitaalka ah iyo Kaabayaasha Dadweynaha ee Dijitaalka, iyo Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee NIRA ee sanadaha 2025–2029. Ujeeddada shirka waxay ahayd inay dhiirrigeliso wadahadal furan, is-weydaarsi aqooneed, iyo ansixinta natiijooyinka muhiimka ah ee horumarinta aqoonsiga dijitaalka ah iyo ajendaha DPI ee Soomaaliya.

Ka-qaybgalayaasha oo ay ku jiraan kooxda Mashruuca ReCIPE ee SONSA ayaa si firfircoon uga qayb qaatay ansixinta qiimeynta UNDP, iyagoo bixinayey aragtiyo ku saleysan waayo-aragnimadooda bulshada iyo ilaalinta xuquuqda dijitaalka ah. Mashruuca ReCIPE waxaa si wadajir ah u maalgelinaya Midowga Yurub iyo Oxfam Ireland, waxaana lagu hirgelinayaa gudaha Soomaaliya si loo taageero maamulka dijitaalka ah ee ammaan ah, hufan, loona wada siman yahay, taasoo gacan ka geysanaysa kobcinta horumarka dalka.




**Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Ka Qaybqaadatay Aqoon-isweydaarsiga IGAD Civil Society Forum for Peace**

**Nairobi, Kenya – 9–11 Luulyo 2025**

*Wafdi ka socda bulshada rayidka Soomaaliyeed oo uu hoggaaminayo Guddoomiyaha Ururka SONSA, Mudane Osman Moallim Mohiadin (Shatah), ayaa ka qaybgalay aqoon-isweydaarsi saddex maalmood socday oo lagu qabtay magaalada Nairobi, Kenya. Aqoon-isweydaarsigan waxaa soo qabanqaabiyay Waaxda Nabadda iyo Amniga ee IGAD, gaar ahaan qaybteeda Dib-u-dhiska iyo Horumarinta Xilliga Kadib Colaadda (PCRD Unit), wuxuuna isu keenay wakiillo ka kala socday ururrada bulshada rayidka ee dalalka gobolka IGAD si ay uga wada hadlaan doorkooda ku aaddan nabadda iyo xasilloonida gobolka.*

*Madashani waxay ahayd fursad muhiim ah oo lagu xoojinayay awoodda bulshada rayidka si ay door muuqda uga ciyaaraan nabad-dhisidda, ka-hortagga colaadaha, iyo kobcinta horumarka waara ee gobolka. Ka-qaybgalayaashu waxay falanqeeyeen arrimo ay ka mid yihiin dib-u-dhiska xilliga colaadaha kadib, nidaamyada digniinta hore, dhismaha nabadda xuduudaha wadaaga ah, iyo sida ay bulshada rayidku ugu lug leeyihiin dejinta siyaasado ilaalinaya xuquuqda aadanaha iyo adkeynta adkeysiga bulshooyinka.*

*Aqoon-isweydaarsiga waxaa si rasmi ah u furay Taliye Sare Jeneraal Habtamu Tilahun, Madaxa PCRD Unit, isaga oo ku hadlay magaca Agaasimaha Waaxda Nabadda iyo Amniga ee IGAD, Commander Abebe Muluneh. Wuxuu muujiyay muhiimadda ka-qaybgalka bulshada rayidka ee dadaallada nabadeed iyo iskaashi amni oo heer gobol ah.*

*Intii lagu guda jiray kulankan muhiimka ah, Guddoomiyaha SONSA Mudane Osman Moallim Mohiadin (Shatah) ayaa si rasmi ah loogu doortay Guddoomiyaha Cusub ee Bulshada Rayidka IGAD. Doorashadan waa guul muhiim u ah bulshada rayidka Soomaaliyeed, waxayna calaamad u tahay kalsoonida gobolka uu u hayo doorka hogaamineed ee bulshada rayidka.*

*Ka-qaybgalka SONSA ayaa mar kale muujiyay sida ay uga go'an tahay bulshada rayidka Soomaaliyeed in ay qayb ka noqoto dadaallada gobolka loogu jiro nabad waarta. Waxa kale oo madashu siisay fursad muhiim ah oo lagu wadaago waayo-aragnimo, lana dhiso iskaashi u adeegaya geeddi-socodka nabadda iyo dib-u-dhiska Soomaaliya, iyadoo la waafajinayo mudnaanta qaran iyo tan goboleed.*



**Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Kormeeray Habka Qiimeynta Imtixaanaadka Dugsiyada Sare ee Gobolka Banaadir**

**Muqdisho – 12 Luulyo 2025**

*Bulshada rayidka Soomaaliyeed oo uu horkacayo Ururka SONSA (Somali National Civil Society Alliance) ayaa maanta ka qaybgalay kormeer rasmi ah oo lagu eegayay habka qiimeynta imtixaanaadka dugsiyada sare ee ka socda maamulka Gobolka Banaadir. Kormeerkan wuxuu qayb ka yahay dadaallada lagu horumarinayo daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka hay'adaha waxbarashada ee dalka.*

*Ururrada bulshada rayidka ee diiradda saara waxbarashada, kuna midaysan madasha SONSA, ayaa si rasmi ah loogu casuumay in ay goob-joog ka noqdaan habka qiimeynta. Ujeeddadu waxay ahayd in la xaqiijiyo hufnaan, la iska ilaaliyo eex iyo musuq, lana dhiirrigeliyo kalsoonida bulshada ee nidaamka waxbarasho ee dalka.*

*Prof. Xuseen Iimaan oo matalayay xafiiska bulshada rayidka ee SONSA, ayaa ka hadlay muhiimadda ay leedahay ka-qaybgalka bulshada rayidka si loo adkeeyo daahfurnaanta, maamul wanaagga, iyo tayada waxbarashada ardayda Soomaaliyeed. Wuxuu xusay in u hoggaansanaanta hufnaanta iyo madaxbannaanida ay fure u yihiin kalsoonida shacabka.*

*Kormeerkan ayaa si wanaagsan loogu soo dhaweeyay maamulka waxbarashada, kuwaas oo ballan qaaday inay la shaqeyn doonaan bulshada rayidka si loo dhiso nidaam waxbarasho loo wada siman yahay, lagu kalsoonaan karo, kuna saleysan himilooyinka horumarka qaranka.*

*SONSA waxay mar kale adkaysay sida ay uga go'an tahay in ay qayb ka ahaato korjoogteynta adeegyada dadweynaha, gaar ahaan waxbarashada, taas oo ah tiir muhiim u ah horumarka, fursad u abuuraysa dhalinyarada, ayna u baahan tahay wadashaqeyn joogto ah.*




**Dalladda SONSA oo Ka Qaybgalay "Habeenka Maamuuska Guusha Wasiirka Maaliyadda H.E. Bihi Iman Egeh"**
**Muqdisho, 17 Luulyo 2025**

Bulshada rayidka Soomaaliyeed oo uu horkacayo Golaha Midowga Bulshada Rayidka Soomaaliyeed (SONSA) ayaa si sharaf leh uga qaybgalay munaasabadda "Habeenka Maamuuska Guusha Wasiirka Maaliyadda H.E. Bihi Iman Egeh," oo uu soo qabanqaabiyey Ururka Bangiyada Soomaaliyeed. Xafladdan waxaa lagu xusay abaal-marinta heer qaran ee uu helay Wasiirka Maaliyadda Dowladda Federaalka Soomaaliya, Mudane Bihi Iman Egeh, oo dhawaan ku guuleystay abaalmarinta Wasiirka Maaliyadda Afrika ee Sanadka oo uu siiyey African Leadership Magazine intii lagu guda jiray Shirweynihii Afrika ee ka dhacay London.

Guddoomiyaha SONSA, Mudane Osman Moallim Mohiadin (Shatah), oo ka hadlay madasha ayaa yiri: "Waxaan si kal iyo laab ah ugu hambalyeynayaa Wasiir Bihi Iman guushan weyn. Abaalmarintan waxay muujinaysaa dadaalka dowladda ee isbeddelka maaliyadeed, hufnaanta iyo isla xisaabtanka."

Wuxuu sidoo kale xusay: "Inkasta oo caqabado ay weli jiraan, guushan waxay iftiiminaysaa horumarka muuqda. Waxay caddeyneysaa in Soomaaliya ay dib isu abaabuleyso, una gudbeyso hanaan daahfuran oo la jaanqaadaya caalamka. Abaalmarintani waa dhiirrigelin qaran oo dhammaan shacabka Soomaaliyeed ah." SONSA iyo bahwadaagta bulshada rayidka ayaa mar kale adkeeyay ka go'naashahooda taageeridda isla xisaabtanka, horumarinta hufnaanta hay'adaha dowladda, iyo kobcinta kalsoonida shacabka. Waxay ballanqaadeen inay sii wadi doonaan garab istaagga dadaallada dib-u-habeynta maaliyadeed.




**Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA oo Cambaareysay Iibinta Dhulka Dadweynaha iyo Diiwaangelinta Doorashada ee Banadir oo Aan Hufanayn**
**19 Luulyo 2025**

Bulshada Rayidka Soomaaliyeed) ayaa muujinaya walaac weyn oo ku saabsan tallaabooyinka dhawaan ay dowladda ku iibisay dhul dadweyne oo hore loogu adeegsan jiray adeegyo muhiim ah sida iskuulada, xarumaha caafimaadka, iyo suuqyada. Iibintan ayaa sababtay in qoysas danyar ah laga barakiciyo, iyadoo saameyn taban ku yeelatay nolosha iyo waxbarashada carruurta. Tallaabooyinkan waxay dhaawacayaan bulshada, kuna kordhinayaan dhibaatada ka jirta deegaanada ay dhulalkaas ku yaallaan.

Sidoo kale, SONSA waxay si weyn uga walaacsan tahay nidaamka diiwaangelinta codbixiyayaasha ee loogu talagalay doorashada golaha deegaanka ee Banadir oo socota, taas oo aan la socon hufnaan ku filan iyo wacyigelin dadweyne oo baahsan. Arrintani waxay dhalinaysaa shaki ku saabsan cadaaladda iyo ka-qaybgalka doorashada, taasoo daciifin karta hanaanka dimuqraadiyadda.

SONSA waxay si degdeg ah ugu baaqaysaa dowladda federaalka iyo maamulka Gobolka Banaadir inay ilaaliyaan xuquuqda dadka ay saameeyeen tallaabooyinkan, joojiyaan iibinta dhulka aan sharciga ku salaysnayn, kana jawaabaan cabashooyinka bulshada. Waxa kale oo ay ku adkaysanaysaa in nidaamka diiwaangelinta codbixiyayaasha lagu sameeyo si hufan, cadaalad ah, oo loo wada siman yahay si loo xaqiijiyo doorashooyin lagu kalsoonaan karo.

Ilaalinta hantida dadweynaha iyo xaqiijinta doorasho hufan ayaa muhiim u ah dhisidda kalsoonida bulshada, nabad waarta, iyo horumar waara.



**Bulshada Rayidka oo Ay Qayb Kayihin Odayaasha Dhaqanka Ayaa Ka Qaybgalay Kulan Wada-tashi Qaran oo Ku Saabsan La-dagaallanka Lacag-dhaqista Sharci darrada ah, Xaaladaha Amni, iyo Gurmadka Bani'aadamnimo ee Deeganadda Awdal.**

**22 Luulyo 2025**

Bulshada rayidka Soomaaliyeed, gaar ahaan odayaasha dhaqanka ee uu hormuudka ka yahay ururka Somalia Non-State Actors (SONSA), ayaa ka qaybgalay kulan heer qaran ah oo ay soo qabanqaabisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka, iyo Dib-u-heshiisiinta Dowladda Federaalka Soomaaliya. Kulanka wuxuu diiradda saaray wacyigelinta la xiriirta la-dagaallanka lacag-dhaqashada sharci darrada ah, maalgelinta argagixisada, colaadaha dhowaan ka dhacay qaybo ka mid ah gobolka Galgaduud, iyo xaaladda gurmadka degdegga ah ee gobollada ay abaartu saameysay sida Awdal.

Kulankan waxaa ka soo qaybgalay wakiillo ka socday ururrada bulshada rayidka, odayaal dhaqameed, iyo saraakiil sare oo dowladeed. Waxaa goobta joogay Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda, Mudane Cabdikhaakiin Xasan Ashkir, iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, taasoo muujisay sida ay dowladda uga go'an tahay wadatashi iyo xal-raadin wadajir ah.

Odayaasha dhaqanka ayaa si xooggan uga hadlay xaaladda amni ee ka taagan Galgaduud, iyagoo ugu baaqay dowladda inay si firfircoon uga qaybqaadato xallinta colaadaha socda iyo in la taageero dhismaha nabadeed ee maamulka SSC-Khaatumo.

Kulanka ayaa sidoo kale lagu iftiimiyay xaaladda abaareed ee ka taagan gobolka Awdal, gaar ahaan degmada Lughaye iyo tuulooyinka ku hareeraysan. Wasaaradda iyo bulshada rayidka waxay si wadajir ah ugu baaqeen shacabka Soomaaliyeed iyo beesha caalamka in ay ka qaybqaataan gurmadka degdegga ah ee loo baahan yahay.

Waxaa sidoo kale la adkeeyay muhiimadda wacyigelinta bulshada iyo la-dagaallanka dhaqdhaqaaqyada lacageed ee sharci darrada ah ee caqabad ku ah amniga iyo xasiloonida dalka.



**Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo uu Horkacayo Guddoomiyaha SONSA oo Wada-hadallo la Yeeshay Kooxda Taageerada Doorashooyinka si Loogu Xoojiyo Deegaan Doorashooyinka La Filaayo.**

**22 Luulyo 2025**

bulshada rayidka Soomaaliyeed oo uu hoggaaminayo Guddoomiyaha SONSA, Mudane Cusmaan Moallim Muxudin, ayaa kulan wax-ku-ool ah la yeeshay Kooxda Taageerada Doorashooyinka ee Isku-dhafka ah (IESG) ee hoos timaadda Xafiiska Hawlgalka Kumeelgaarka Qaramada Midoobay ee Soomaaliya ee (UNTMIS).

Kulanka ayaa ujeeddadiisu ahayd in la xoojiyo kaalinta ay bulshada rayidku ku leedahay taageeridda doorashooyinka golayaasha deegaanka ee soo socda, gaar ahaan dhanka wacyigelinta iyo waxbarashada madaniga ah si kor loogu qaado fahamka iyo ka-qaybgalka shacabka.

Doodaha ayaa diiradda saaray xoojinta iskaashiga u dhexeeya ururrada bulshada rayidka iyo Kooxda Taageerada Doorashooyinka ee Isku-dhafka ah (IESG) si si wadajir ah loogu taageero Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka (NIEBC), iyadoo la dardargelinayo hannaanka doorasho ee hufan, daahfuran, kuna saleysan ka-qaybgalka bulshada.

Kulanka wuxuu muujiyay go'aanka wadajirka ah ee lagu xoojinayo dawlad wanaagga, kalsoonida shacabka ee hay'adaha doorashooyinka, iyo muhiimadda ka-qaybgalka dhammaan qeybaha bulshada—haween, dhalinyaro, iyo kooxaha la haybsooco.

Waxaa sidoo kale la xusay doorka muhiimka ah ee ay bulshada rayidku ku leedahay isku xirka bulshada iyo hay'adaha, gaar ahaan dhanka wacyigelinta codbixiyeyaasha, kormeerka doorashooyinka, iyo abaabulka bulshada.

Iyadoo dalka uu isu diyaarinayo doorashooyinka golaha deegaanka, iskaashigan cusub wuxuu calaamad u yahay tallaabo muhiim ah oo loo qaaday dhanka doorashooyin hufan, loo siman yahay, loona dhanyahay .



Somalia Non-State Actors (SONSA)

Tell:252612008723, info@sonsaplatform.org, executivedirector@soscensa.org, www.sonsaplatform.org

BAAQ KU AADAN DAGAALKA MAANTA KA DHACAY MAGAALADA BALADXAAWA

**Muqdisho 22th July 2025;** Dallada Bulshada Rayidka ee SONSA waxa ay aad uga xun tahay dagaalka maanta ka dhacay magaalada Baladxaawa kaas oo u dhaxeeyey ciidamada dowladda federaalka iyo ciidanka maamul goboleedka Jubbaland dagaalkas oo sababey dhimasho, dhaawac iyo barakac dadka rayidka ah. Waxa aan ilaah uga baryeynaa intii ku dhimatay naxariistii janno in uusiiyo inta ku dhaawacanteyna caafimaad degdeg siiyo.

Runtii waa wax laga xumaado sii socoshada khilaafka siyaasdadeed ee u dhaxeeya dowladda federaalka iyo dowlad goboleedka Jubbaland iyada oo aan ogsoonahey in aysan aheyn markii u horeysey oo laysku adeegsado iska hor imaad ciidan. Bulshada Rayidka waxa ay ka digeysaa isku

## Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Cambaareysay Dagaalkii Balad-Xaawo, una Baaqday Wadahadal Siyaasadeed

**22 Luulyo 2025**

Dalladda Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA ayaa si adag u cambaareysay dagaalkii naxdinta lahaa ee ka dhacay magaalada Balad-Xaawo ee dhexmaray ciidamada Dowladda Federaalka iyo kuwa Dowlad Goboleedka Jubbaland. Dagaalkaas ayaa sababay dhimasho badan, dhaawacyo culus, cabsid gelin shacabka, iyo barakac baahsan.

SONSA waxay muujisay murugo weyn oo ku aaddan dadkii rayidka ahaa ee ku dhintay, waxayna Alle uga baryeen caafimaad degdeg ah kuwa dhaawacmay. Dalladdu waxay dagaalka ku tilmaantay inuu yahay kacdoon kale oo muujinaya heerka uu gaaray khilaafka siyaasadeed ee u dhexeeya dowladda Federaalka iyo Jubbaland—khilaaf muddo soo jiitamayay. SONSA waxay ku baaqday in si degdeg ah dib loogu laabto wadahadal siyaasadeed oo hufan, oo dadban, oo loo dhan yahay.

Bulshada rayidku waxay si buuxda uga soo horjeesteen in awood ciidan loo adeegsado khilaafaadka siyaasadeed, iyagoo xusay baahida degdegga ah ee loo qabo isu soo dhowaansho, ixtiraam siyaasadeed, iyo dhisidda kalsooni dhex marta dhinacyada isku haya arrimaha siyaasadeed. Colaadahani oo soo billowday 16-kii Juun 2025, waxay saameeyeen deegaano kala duwan oo ay kamid tahay caasimadda Muqdisho.

SONSA waxay ugu baaqday dowladda federaalka iyo Jubbaland inay dib ugu noqdaan wadahadal dhab ah, si loo dejiyo xiisadda loona joojiyo waxyeelada shacabka. Waxa ay ka digtay in sii socoshada khilaafkan ay halis gelin karto wadajirka ummadda, amniga shacabka, iyo horumarka nidaamka dowlad-dhiska ee dalkeena.

Ugu dambeyn, SONSA waxay si adag ugu baaqday odayaasha dhaqanka, culimada, dhalinyarada, iyo aqoonyahanka Soomaaliyeed in ay si mideysan uga dhiidhiyaan, kana shaqeeyaan xal waara oo lagu joojin karo colaadaha siyaasadeed. Kaalintooda waa mid muhiim ah si loo ilaaliyo nafta dadka, kalsoonida bulshada, iyo mustaqbalka dalka Soomaaliyeed.



## Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Ay Hoggaamineyso Dalladda SONSA iyo Guddiga Doorashooyinka Qaranka oo Sii Wadajir ah u Xoojinaaya Iskaashiga Kahor Doorashooyinka Deegaanka

**23 Luulyo 2025.**

bulshada rayidka Soomaaliyeed oo uu hormuud ka yahay Guddoomiyaha Dalladda (SONSA), Mudane Cusmaan Moallim, ayaa kulan istiraatiiji ah la yeeshay Guddiga Madaxa Bannaan ee Doorashooyinka iyo Xuduudaha Qaranka (NIEBC), oo uu hoggaaminayo Guddoomiyaha Guddiga, Mudane Cabdikariim Axmed Xasan. Kulankan ayaa diiradda lagu saaray xoojinta wada-shaqeynta labada dhinac kahor doorashooyinka goleyaasha deegaanka ee soo socda.

Doodaha ayaa xooga lagu saaray hannaanka diiwaangelinta codbixiyeyaasha ee socda, caqabadaha jira, iyo sidii loo horumarin lahaa iskaashiga u dhexeeya bulshada rayidka iyo guddiga doorashooyinka. Guddoomiye Cusmaan Moallim wuxuu xusay kaalinta muhiimka ah ee bulshada rayidka ay ku leedahay wacyigelinta dadweynaha iyo waxbarashada civika ah. Waxa uu ku dhiirrigeliyay Guddiga in ay toddobaadle u qabtaan warbixinno furan oo dadweynaha la wadaago, si loo dhiso kalsoonida shacabka iyo daahfurnaanta geeddi-socodka doorashada.

SONSA ayaa sidoo kale soo bandhigtay diyaar u ahaanshihiisa in uu adeegsado Election Situation Room (ESR)—madal lagu dabagalo, lagu qiimeeyo, laguna lafo-guro xaaladaha doorashada si waqtigaas loo hayo xog sugan, iyadoo lagaashanayo shabakadda ururrada bulshada rayidka ee dalka.

Dhankiisa, Guddoomiye Cabdikariim Axmed Xasan ayaa la wadaagay xogta horumarka laga gaaray diiwaangelinta, agabka cusub ee la diyaariyay, iyo ballanqaadka guddiga ee ku aaddan in doorashooyinka ay noqdaan kuwo loo siman yahay, daahfuran, laguna kalsoonaan karo. Waxa uu ku bogaadiyay SONSA kaalinta ay ka qaadanayaan hannaanka doorasho.

Ugu dambeyn, Guddoomiyaha NIEBC ayaa soo jeediyay in la dhiso koox farsamo oo wadajir ah oo ka kooban SONSA iyo NIEBC si loo xoojiyo wada-shaqeynta, is-qorsheynta, iyo xalinta caqabadaha inta lagu guda jiro marxaladaha doorashada.

Kulanka ayaa si buuxda u muujiyay ballanqaadka labada dhinac ee ah in la hirgeliyo hannaanka dimuqraadiyadeed ee ku dhisan ka-qaybgalka shacabka Soomaaliyeed.



## Dalladda SONSA oo Soo Dhawaysay Ardaydii Ugu Horreysay ee Ka Soo Qeybgalaya Barnaamijka Intern-ka ee Jaamacadda Muqdisho

**24 Luulyo 2025**

Xafiiska Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee Dalladda SONSA ayaa si rasmi ah u soo dhaweysay kooxdii ugu horreysay ee ardayda intern-ka ka noqda hay'adda, kuwaasoo ka socda Jaamacadda Muqdisho. Munaasabadda soo dhoweynta waxaa hogaaminayay Agaasimaha Fulinta ee SONSA, Mudane Maxamed Aadan (Shire), oo muujiyay muhiimadda iskaashigan iyo doorka uu ku leeyahay kobcinta awoodda dhalinyarada Soomaaliyeed.

Ardayda intern-ka ah ayaa ah kuwo dhigta semester-koodii ugu dambeeyay ee kuliyadda Shaqada Bulshada (Social Work) ee Jaamacadda Muqdisho. Inta lagu guda jiro barnaamijkan, waxay ardaydu ka qayb qaadan doonaan barasho nidaamsan oo ay ku helayaan waayo-aragnimo dhab ah oo ku saabsan mowduucyada muhiimka ah ee SONSA sida: wacyigelinta civika, xuquuqda aadanaha, maamul wanaagga, cilmi-baarista, horumarinta bulshada, iyo u doodista siyaasadeed.

Barnaamijkan intern-shibka ah wuxuu ujeedkiisu yahay in uu isku xiro waxbarashada tacliinta sare iyo duruufaha dhabta ah ee shaqada. Waxa uu ardayda siinayaa fursad ay aqoontooda uga hirgeliyaan deegaanka, uga qaybqaataan geeddi-socodka bulshada, iyo in ay gacan ka geystaan barnaamijyada dib-u-dhiska iyo xoojinta midnimada bulshada.

Sidoo kale, barnaamijku wuxuu dhiirrigelinayaa hoggaaminta dhalinyarada iyo ka-qaybgalka ardayda ee howlaha bulshada iyo dib-u-habaynta adeegyada dadweynaha. SONSA waxay mar kale xaqiijisay inay ka go'an tahay dhisidda jiil cusub oo xirfad leh, mas'uul ah, kuna saleysan qiyamka dimuqraadiyadda iyo ka qaybqaadashada shacabka.

Tani waxay tusaale u tahay iskaashi guul leh oo u dhexeeya jaamacadaha iyo ururrada bulshada rayidka Soomaaliyeed, si loo abuuro fursado dhab ah oo dhalinyaradu ku matali karaan danaha shacabka.



## Xafiiska Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA iyo EFASOM oo Ka Wada Hadlay Xoojinta Iskaashiga Ku Saabsan U-doodista Waxbarashada

**26 Luulyo 2025.**

Agaasimaha Fulinta ee Dalladda SONSA, Mudane Maxamed Cadceed Cali, ayaa kulan miro-dhal ah la yeeshay hoggaanka Dalladda EFASOM (Education For All Somalia Coalition). Kulankan ayaa diiradda saaray xoojinta iskaashiga labada dhinac iyo sahminta fursado cusub oo ay si wadajir ah ugu doodaan horumarinta waxbarashada Soomaaliya.

In kasta oo SONSA si xooggan diiradda u saarto arrimaha siyaasadda, dhismaha dowladnimada, ka-qaybgalka bulshada iyo ajandaha nabadda, haddana labada dhinac waxay isku raaceen in ay muhiim tahay in ururrada bulshada rayidka ah door weyn ka ciyaaraan siyaasadda waxbarasho iyo qorsheynta qaranka.

Kulanka waxaa lagu muujiyay rabitaan wadajir ah oo ah in SONSA ballaariso shaqadeeda si ay uga mid noqoto u-doodista waxbarasho loo siman yahay, gaar ahaan carruurta nugul sida kuwa naafada ah, kuwa colaadaha saameeyeen, ama ku nool duruufo nololeed oo adag.

Waxay labada dhinac si gaar ah uga wada hadleen sidii ay dowladda ugu cadaadin lahaayeen in miisaaniyadda waxbarashada kor loo qaado. SONSA iyo EFASOM waxay ku heshiiyeen in ay adeegsadaan shabakadahooda iyo xiriirkooda hay'adaha si waxbarashada loogu dhiibo mudnaanta ay u qalanto ee horumarka dalka.

Kulanka wuxuu kusoo dhammaaday ballanqaad lagu horumarinayo hindiseyaal isku-duuban oo lagu xaqiijinayo waxbarasho tayo leh, loo dhan yahay, kana faa'iideysan kara dhammaan carruurta Soomaaliyeed.

Iskaashigan cusub wuxuu muujinayaa isbeddel istiraatiiji ah oo ay SONSA ku ballaarineyso howlaheeda, iyadoo waxbarashada u aragta laf-dhabarta horumarka waara iyo dhismaha nabadda dalka.



**SONSA oo Soo Gabagabeysay Kulan Laba Maalmood SOcday oo Ku Saabsanaa Tababar Awood-dhis ah oo Loo Sameeyay Qayb Kamid Ah Ururrada Bulshada Rayidka**
**28 Luulyo 2025**

Dalladda Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA, iyada oo ka shaqeyneysa mashruuca Gole Kaab oo ay maalgelisay Midowga Yurub ee Soomaaliya ayna taagereysa Hey'dda NIMD ayna fulineysa Dalladda SONSA, ayaa si rasmi ah u soo gabagabeysay kulankii tababarka awood-dhiska ee socday muddo laba maalmood ah, laguna qabtay magaalada Muqdisho. Tababarkani wuxuu diiradda saaray kor u qaadidda fahamka ururrada bulshada rayidka ee hannaanka go'aan-qaadashada dowladda iyo dib-u-eegista siyaasadaha.

Kulanka waxaa si rasmi ah u furay kuna soo xiray Guddoomiyaha SONSA, Mudane Cusmaan Moallim, waxaana kasoo qeyb galay hoggaamiyeyaasha ururrada bulshada rayidka, dhalinyaro hoggaan ah, iyo ardayda intern-ka ee jaamacadaha la shaqeeya SONSA.

Maalintii ugu horreysay, tababarka wuxuu iftiimiyay fursadaha bulshada rayidka u furan ee ay kaga qaybqaadan karaan hannaanka maamulka. Waxaa la sameeyay shaqo kooxeed, tusaalooyin nololeed (case studies), falanqayn dhacdooyin (scenario analysis), iyo jilid doorar (role-play), taasoo ka caawisay ka qaybgalayaasha in ay fahmaan caqabadaha iyo fursadaha ka jira u-doodista iyo ka-qaybgalka dadweynaha.

Ardayda intern-ka ah waxay door firfircoon ka ciyaareen tababarka, iyagoo helay khibrad toos ah oo ku saabsan sida bulshada rayidku ula falgasho hay'adaha si kor loogu qaado hufnaanta iyo go'aan qaadasho daahfuran.

Maalintii ugu dambeysay waxaa diiradda la saaray Maamul Dad-weyne u Dhaxeeya (Citizen-Centric Governance), iyadoo la falanqeeyay doorka ay bulshada rayidku ku leeyihiin la-xisaabtanka iyo kormeerka, waxaana la soo saaray qorshayaal ficil ah oo ay ururradu ku wajahaan baahiyahooda deegaanka.

Tababarkani wuxuu calaamad u yahay dadaalka SONSA ee ku aaddan kobcinta awoodda bulshada rayidka si ay doorkooda uga ciyaaraan siyaasadda guud, nabadda, iyo horumarka Soomaaliya.




**Xafiiska Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA iyo EFASOM oo Ka Wada Hadlay Xoojinta Iskaashiga Ku Saabsan U-doodista Waxbarashada**
**30 Luulyo 2025.**

Kulan ay isla soo qabanqaabiyeen Mogadishu Forum iyo Dalladda SONSA, ayaa isu keenay masuuliyiin dowladda kasocday sida xildhibaano katirsan guddiga miisaaniyadda golaha shacabka BJFS, aqoonyahanno dhaqaalaha ah, iyo hoggaamiyeyaasha bulshada rayidka si ay uga wada hadlaan kor u qaadidda ka-qaybgalka dadweynaha ee qorsheynta miisaaniyadda qaranka ee Soomaaliya.

Shirka waxaa ka qaybgalay Guddoomiye ku-xigeenka Guddiga Miisaaniyadda, Maaliyadda, Qorsheynta, Iskaashiga Caalamiga ah, iyo Kormeerka Hay'adaha Dowladeed ee Golaha Shacabka, wasiirro hore, xoghayaha joogtada ah ee Wasaaradda Maaliyadda, khabiirka dhaqaalaha Prof. Yahye Amir, iyo wakiillo ka socday ururrada bulshada rayidka.

Furitaanka shirka waxaa si rasmi ah u sameeyay Guddoomiyaha SONSA, Mudane Cusmaan Moallim, oo soo dhaweeyay ka qaybgalayaasha, isla markaana adkeeyay muhiimadda ay leedahay dood furan oo loo dhan yahay.

Qodobbadii muhiimka ahaa ee laga dooday waxaa ka mid ahaa:

- Ka qaybgal xaddidan oo ay bulshada rayidku ku leeyihiin hannaanka miisaaniyadda qaranka.
- Helitaanka xaddidan ee shacabka u hayaan Warbixinta Xisaab Xirka Sanadlaha.
- Baahida degdegga ah ee loo qabo daahfurnaan, la-xisaabtan, iyo iskaashi hay'adaha dowladda si miisaaniyadda loogu saleeyo baahiyaha shacabka.

Agaasimaha Guud Suleiman S. Omar oo ka socday Wasaaradda Maaliyadda ayaa sheegay in golaha baarlamaanka uu hormuud ka yahay kormeerka miisaaniyadda, halka bulshada rayidkuna ay door muhiim ah ka ciyaarto, taasoo lagu magacaabo "laanta afraad", oo kor u qaadda hufnaanta iyo la-xisaabtanka dowladda.

Ka qaybgalayaasha waxaa lagu dhiirrigeliyay in ay su'aalo adag ka keenaan dhammaan marxaladaha miisaaniyadda laga soo bilaabo qorsheynta iyo qodobbada miisaaniyadda ilaa ansixinta Golaha Wasiirrada iyo doodaha baarlamaanka, iyagoo codkooda ku biirinaya sidii miisaaniyadda ugu dambeysa ay u noqon lahayd mid matasha baahiyahooda.

Shirkan wuxuu astaan u yahay tallaabo muhiim ah oo loo qaaday dhanka dawladnimo hufan, ka-qaybgal dadweyne, iyo miisaaniyad daahfuran oo lagu saleeyo danta shacabka Soomaaliyeed.





**Inta uu Socday Kulanka Dadweyne Xildhibaan Maxamed Haaruun oo Ka Hadlay Dib-u-habeynta Miisaaniyadda Adeegyada Bulshada**
**30 Luulyo 2025**

Inta uu socday Kulanka ay isla soo qabanqaabiyeen Mogadishu Forum iyo Dalladda SONSA, ayaa isu keenay masuuliyiin dowladda kasocday sida xildhibaano katirsan guddiga miisaaniyadda golaha shacabka BJFS, aqoonyahanno dhaqaalaha ah, iyo hoggaamiyeyaasha bulshada rayidka si ay uga wada hadlaan kor u qaadidda ka-qaybgalka dadweynaha ee qorsheynta miisaaniyadda qaranka ee Soomaaliya.

Qaar kamid ah bulshada rayidka ayaa weydiiyay su'aalo xubnaha Agaasimaha Guud wasaaradda maaliyada iyo xubnaha golaha shacabka ee guddiga miisaaniyadda BJFS ee fadhiyay madashaa dooda.
sidaas darteed Xildhibaan Maxamed Haaruun Cabdullaahi, oo ah xubin ka tirsan Golaha Shacabka isla markaana ah Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga Miisaaniyadda, Maaliyadda, Qorsheynta Iskaashiga Caalamiga ah iyo Kormeerka Hay'adaha Dowladda ayaa ka jawaabaya su'aal muhiim aheed ay weydiiyeen xubnaha bulshada rayidka soomaaliyeed ayaa sidaas darteed wuxu muujiyay sida Baarlamaanka uga go'an tahay isla xisaabtan iyo dib-u-habeyn dhab ah.
"Baarlamaankeennu waa mid ka mid ah kuwa ugu waxtarka badan hey'adaha dowladda. Waxaan si buuxda u mariyaa habraacyada lagama maarmaanka u ah ansixinta miisaaniyadda qaranka. Waxaa naga go'naa in miisaaniyaddu ka tarjumto baahida shacabka. Sidaas darteed, waxaan kor u qaadnay miisaaniyaddii loo qoondeeyay adeegyada bulshada sida caafimaadka iyo waxbarashada—kuwaas oo horey u helayay miisaaniyad aad u yar," ayuu yiri Xildhibaanku.
Shirku wuxuu si gaar ah u adkeeyay muhiimadda ay leedahay daahfurnaan, la-xisaabtan bulsho iyo iskaashi hay'adeed, si loo xaqiijiyo in miisaaniyadda qaranku noqoto mid ka tarjumeysa mudnaanta iyo xuquuqda muwaadiniinta Soomaaliyeed.



**Dalladda Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA oo Qabatay Madal Lagu Taageerayo Xuquuqda Dijitaalka ee Dadka Naafadda iyo Dardar-gelinta Istaraatiijiyadda Qaranka ee Naafadda Soomaaliyeed.**
**30 Luulyo 2025.**

Dalladda Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA, iyagoo la kaashanaya bah-wadaagtooda Ururada Naafada Soomaaliyeed, ayaa qabtay madal qaran oo lagu falanqeeyay horumarinta xuquuqda dijitaalka ee dadka naafada ah iyo dardar-gelinta Istaraatiijiyadda Qaranka ee Naafonimada Soomaaliya.
Madalka waxaa kasoo qaybgalay u doodeyaasha xuquuqda dadka naafada ah, mas'uuliyiin dowladeed, hoggaamiyeyaasha bulshada rayidka, iyo khubaro dhanka tiknoolajiyadda ah. Waxaana diiradda lagu saaray sidii Istaraatiijiyadda Qaranka ee Naafonimada loogu waafajin lahaa siyaasadaha dijitaalka ee loo dhan yahay. Waxaa tusaale ahaan lagu falanqeeyay Istaraatiijiyadda Qaramada Midoobay ee Naafonimada (UNDIS) iyo Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Naafada (CRPD).
#SONSA waxay soo bandhigtay muhiimadda ay leedahay in is-beddelka dijitaalka ee Soomaaliya lagu saleeyo helitaan iyo ka-qaybgal buuxa, si aan cidna loogu harin gaar ahaan dadka naafada ah.
Ka qaybgalayaashu waxay la wadaageen aragtiyo qiiro leh oo muujinaya in u doodista xuquuqdu aysan ku ekaan hadal, balse ay horseedo isbeddel sharciyeed oo dhab ah. Waxaa si xoog leh loo adkeeyay in ka-mid-noqoshada dijitaalka aysan ahayn oo keliya waajib sharci ah balse ay tahay xuquuq aasaasi ah oo bini'aadantinimo.
Madalkani wuxuu ahaa tallaabo muhiim ah oo lagu dhisayo Soomaaliya loo dhan yahay oo si buuxda dijitaal ugu furan dadka naafada ah.